Ogsoonow Xuquuqda aad Sharciga ku Leedahay

The Family Educational Rights and Privacy Act (FERPA) (Qaanuunka Gaarka ah ee Xuquuqda Waxbarashada ee Qoyska), oo ah sharci ay dawladda dhexe soo saartay, waxaa uu xaqiijinayaa in:

Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta in ay arki karaan macluumaadka waxbarashada ee ardaydooda. Mar haddii ay carruurta gaaraan 18 sano, waxaa ay awood u helayaan in ay helaan macluumaadkooda.

Haddii aad isleedahay macluumaadka ardaygaaga sax ma ahan, waxaad ka codsan kartaa dugsiga in ay arrintaasi saxaan. Haddii uu dugsigu diido, waxaad xaq u leedahay in dacwad dhageysi laguu qabto. Xittaa haddii aadan ku guuleysan dacwad dhageysiga, waxaa kuu suuragaleysa in fasiiraaddaada qaladaadka la xiriirta la geliyo galka macluumaadka ardayga.

Badanaa, dugsiga waa in uu helaa oggolaashadaada marka ay macluumaadka ardaygaaga tusayaan dad kale.

The Washington Public Records Act (Qaanuunka Diiwanka Dadweynaha ee Washington) waxaa uu dadweynaha u fasaxayaa in ay codsadaan oo ay dib u eegaan dukumeentiyada badankooda ee ay soo saaraan dugsiyada iyo maamulka degmooyinka ee dugsiga — oo ay ku jiraan sharciyada iyo nidaamka, miisaaniyadda, waraaqahaa hawlaha dugsiga iyo qorshooyinka maadooyinka ee macallimiinta.

Sida Cabashada loo Gudbiyo si Dadka ay kuu Maqlaan

Si toos ah qofka ugu tag.
Waxaad billawdaa in aad wada hadal la yeelatid qofka aad is khilaafsan tihiin.

Noqo qof nidaam ku socda.
Waxaad billawdaa in aad dhibaatada kala hadashid adigoo sameysanaya liis ay ku yaalliin su'aalaha ama dhibcooyinka ee aad soo qaadan lahayd. La soco waxa muhiimka ah oo mawduucana yaan laga weecan.

Is deji.
Si fiican hawo u qaado. Waxaad xoogga saartaa dhibaatada jirta, ee ha saarin qofka. Kala hadal caddaymaha oo hadalkaagu ha noqdo mid bayaan ah. Ha weerarin qofka.

Niyaddaada qayr u sheeg.
Xittaa haddii aadan ku qanacsaneyn arrinta, waxaad dadka u sheegtaa in aad ku faraxsan tahay hawsha ay ka geysteen xal u helidda dhibaatada.

Dhanka kale wax ka eeg.
Waxaad isku daydaa in aad si fiican u fahantid aragtida qofka kale ee arrinta iyo xalalka ay soo jeedinayaan. Waxaad wax ka weydiisa wax kasta oo aan kuu caddeyn.

Waxaad isticmaashaa luqadda ku habboon.
Waxaad tiraah "waxaan aaminsanahay," "waxaan dareensanahay," ama "waxaan karnaa" intii aad odhan lahayd "waa in aad." Waxaad isku daydaa in aad tiraah "waxaan fahansanahay in ay lacagtu yar tahay..." ama "waxaan ogsoonahay in aad qabtiin waxyaabo badan ee aad muhiimad siineysaan si ay isugu dheelitirmaan..." Waxaad isticmaashaa xarafka "iyo" intii aad istcmaali lahayd "balse."

Waxaad noqotaa qof beddelmi kara.
Waxaad ogsoonaataa in dhibaatooyinka dhowr nooc loo xallin karo. Waxaad u diyaar noqotaa noocyo kala duwan ee wax lagu xallin karo.

Macluumaadka meel ku hayso.
Waxaad kaydsataa waraaqaha, foomamka la buuxiyey, iyo waxyaabaha kale. Waxaad haysataa qoraallo ku saabsan dadka aad wada hadasheen, waxa aad ka wada hadasheen, iyo natiijada ka soo baxday wadahadalkaasi.

Office of the Education Ombudsman (Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada)
1110 Capitol Way S, Suite 304
P.O. Box 40004
Olympia, WA 98504-0004

Khadka bilaashka ah: 1-866-297-2597
FAAKIS: (360) 586-0052
www.waparentslearn.org

Waxaad la soo xiriirtaa (Office of the Education Ombudsman) Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada haddii aad doonaysid in aad heshid dukumeentigan oo noocyo kale ah ee loogu talagalay dadka naafada ah.

(Office of the Education Ombudsman) Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada waxaa uu siiyaa ardayda, qoysaska iyo bulshada macluumaadka ku saabsan nidaamka waxbarashada dadweynaha, waxaana ay dhiirigeliyaan ka qayb qaadashada waxbarashada ee qoysaska iyo bulshada, waxaana uu ka caawiyaa qoysaska iyo ardayda xal u helidda khilaafaadka dugsiyada ku saabsan.

Xallinta Khilaafaadka Dugsiyada
Resolving Conflict with Schools

Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada
Office of the Education Ombudsman
Tilmaamaha Qoyska
A Guide for Families

Gobolka Washington
Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka
State of Washington
Office of the Governor

Somali

Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada

Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada waa hay'ad ka tirsan Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka ee ay sameeyeen Guddiga Sharci Dejinta sanadkii 2006. Waxaanu ka caawinaa ardayda gobolka Washington in ay guul gaaraan inagoo ardayda iyo qoysaskooda la socodsiinayno nidaamka waxbarashada dadweynaha, islamarkaana ka caawinayno in ay si wax ku ool leh ay ula xiriiraan shaqaalaha dugsiga, iyo in aan ka caawino ardayda iyo qoysaskooda khilaafaadka soo kala dhexgala iyaga iyo dugsigooda ama maamulka dugsiga ee degmada. Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada waxaa uu uga warbixiyaa Guddoomiyaha Gobolka, Guddiga Sharci Dejinta iyo Guddiga Waxbarashada Gobolka baahida ay ka qabaan ardayda iyo qoysaskooda dugsiyada dadweynaha, waxaana uu ka talo bixiyaa wax ka qabadka iyo horumarinta nidaamka waxbarashada gobolka.

Tallaabooyinka Lagu Xallinayo Khilaafaadka Dugsiyada

Khilaafaad badan ayaa lagu xallin karaa tallaabada hore ee ku qoran liiska hoose. Tijaabi, haddii aadan ku qanacsaneyn, isku day tallaabooyinka hadba kii aad u baahatid. Si lagaaga caawiyo, waxaad la soo xiriirtaa Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada.

1. Waxaad la hadashaa shaqaalaha dugsiga uu khilaafka idinka dhaxeeyo. Haddii aadan ku kalsoonayn in aad kaligaa hadashid oo aysan dhaqankaaga ka mid ahayn, waxaad hore u soo kaxeysan kartaa qof kuu dooda ama qof reerka ka tirsan. Haddii af Ingiriiska uusan ahayn luqaddaada hore, waxaad dugsiga ka codsataa in ay turjubaan kuu keenaan.
2. Waxaad la hadashaa horjoogaha shaqaalaha dugsiga ama maamulaha dugsiga.
3. Waxaad la hadashaa horjoogaha maamulaha dugsiga kaasoo laga helo xafiiska dhexe ee maamulka degmada ee dugsiga. Haddii ay degmadu yar tahay, waxaa suuragal ah in maamulaha dugsiga uu warbixinta siiyo u Xilsaaranaha. Haddii ay weyn tahay degmada uu dugsiga ka tirsan yahay, horjoogaha ayaa suuragal ah in uu yahay ku Xigeenka u Xilsaaranaha, Agaasimaha Waxbarashada, Hoggaamiyaha Shaqaalaha, ama Sarkaalka Hoggaamiya Waxbarashada.
4. Waxaad si toos ah ula hadashaa u Xilsaaranaha, shaqaalaha ugu sarreeya maamulka degmada ee dugsiga, haddii aadan hore sidaa u sameynin.
5. Haddii ay dhibaatada ka taagan tahay nidaamka guud ahaaneed, waxaad kaloo la hadli kartaa xubin ka tirsan Guddiga Dugsiga ee qaabilsan xaafaddaada. Xubnaha Guddiga Dugsiga waa shakhsiyaad la soo doorto waxaana ay wadajir ahaan u shaqaaleeyaan oo ay kormeeraan u Xilsaaranaha.
6. Waalidiinta ardayda dhigata waxbarashada gaarka ah iyo barnaamijyada luqadaha kala duwan waa in ay raacaan nidaamka u degsan ashtakooyinka ee ay dejisay dawladda dhexe, ee laga doonayo in degmooyinka ay ka faallo bixiyaan.

Markasta ee aad go'aansatid in aad su'aasha la tagtid heer cusub, u sheeg qofkii kugu dambeysay, wadahadalladuna ha noqdaan kuwo furan si loo helo qaab xal loo gaaro. Haddii ay midna shaqeyn waydo, waxad la xiriirtaa Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada.

Haddii ay Dhibaatadu sii Socoto

Haddii aad kaligaa dhibaatada xallin waydid, oo ay dhibaatadu tahay mid hoos imaanayso Sarkaalka Ashtakooyinka Waxbarashada, inaga ayaa ku caawinayna. Hawsheennu waa in aan ku caawino haddii:

Uu dugsigaaga ka soo jawaab bixin cabashadaadii, ama uu si aan munaasib ahayn kaaga jawaabay;

Uu dugsiga raacina sharciga gobolka, dawladda dhexe ama qaanuunka u degsan maamulka degmada,

Iyo

Ay waxbarashada ardaygaaga dhibaato soo gaartay, ama bey'adda waxbarasho si qaldan ay u saameysay tallaabada dugsiga ama tallaabo qaadis la'aanta.

DHIBAATOOYINKA MEELAHA KALE LA GAARSIIYO

Waxaannu tixraac kugu diraynaa meelo kale ee kaa caawiya:

Ashtakooyinka looga dan leeyahay saraakiisha la soo doorto.

Dhibaatooyinka la xiriira dugsiyada gaarka ah, hay'adaha gaarka ah ama ganacsiyada.

Latalinta Sharciga.

SIDA AAN KUU CAAWINI KARNO

Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka waxaa uu ka bixiyaa aragti dhexdhexaad ah xaaladda dhibaatada leh ee kula soo gudboonaatay iyo caawinaad la xiriirta xal u helidda dhibaatada.

Waxaannu oggol nahay ashtakooyinka qoraalk ah ee waalidiinta, mas'uuliyiinta ama ardayda ka kala socota dugsiyada hose iyo sare ee Washington. Foomamka ashtakooyinka ayaa la helayaa iyagoo ku kala yaal luqado kala duwan. Waxaad xafiiskayaga aad xag taleefan uga codsataa foomka ashtakada ama waxaad ka daabacaddaa boggayaga ee internetka: **www.waparentslearn.org**

Haddii waalidiinta ama ardayda ay aaminsan yihiin in si dadka kale ka duwan lagula dhaqmay taasoo ay saldhig u tahay jinsiyadda, nooca qofka, itaal darrida, diinta ama sabab kale, waxaa ay xaq u leeyihiin in ay u soo gudbiyaan ashtakada kala sooca (Washington State Human Rights Commission) Guddiga Xuquuqul Insaanka ee Washington ama Waaxda Waxbarashada Mareykanka, Xafiiska Xuquuqda Dadweynaha.

Washington State Human Rights Commission
(Guddiga Xuquuqul Insaanka Gobolka Washington)
Khadka bilaashka ah: 1-800-233-3247

U.S. Department of Education
Office for Civil Rights
Seattle Office (Xafiiska Seattle): (206) 220-7900